“Xorriyo Nin Geyaa” Goormuu Dhalan?

Faaqidaad-masraxeed Darsaysa Riwaayaddii

Xorriyo

Maxamed D. Afrax

July 05, 2010

Hordhac

Rubuc qarni ka hor, xilli Soomaalidu ahayd qaran sharaf iyo haybad weyn ku dhex leh quruumaha dunida ayuu abwaan Soomaaliyeed curiyey riwaayad caan-baxday. Wuxuu magac uga dhigay ***Xorriyo Nin Gayaa Ha Guursado***, markii la soo gaabiyey waxay ku caan baxday ‘Xorriyo’. Waa magacii qalanjada riwaayadda. Magaca buuxa ee ah ‘Xorriyo Nin Gayaa ha Guursado’ waxaa ku jira duur-xul qota dheer. Duur-xulku wuxuu ka mid yahay farsamooyinka lagu qurxiyo halabuurka suugaanta. Xorriyo waxay safka hore ka gashay dhawrka ugu caansan riwaayadihii soo maray masraxa Soomaalida.

Maxay ahaayeen sababaha caawiyey inay sidaa u caan-baxdo? Maxay ka hadlaysaa riwaayaddani? Habkee bay u soo bandhigaysaa waxa ay ka hadlayso? Waa maxay suugaan-bilayaasha ama farsamooyinka suugaaneed ee uu adeegsaday mu’allifku? Sidee bay u saamaysay geeddi-socodkii taariikhda Soomaaliya? Maxaa lagu bogaadin karaa maxaase lagu dhaliili karaa? Maxaan waqtigan u xulannay Xorriyo iyo faaqidaddeeda? Waa maxay casharka aan ka baran karayno? Ubucda qoraalkan waxaan ku faaqidaynaa su’aalahaas jawaabtooda.

Xulashada Xorriyo iyo Xeel-dheerida Magaca

Aan ku bilowno kana tilmaan-qaadanno magaca riwaayadda. ‘Xorriyo’ waa magaca riwaayaddan waana magaca qalanjada sheekadu ku socoto. Waa magac sarbeeb ahaan loo adeegsanayo. Sarbeebtu guud ahaan waa farsamo ay si joogta ah u adeegsadaan halabuurka suugaantu, dunida oo dhan. Soomaaliduna aad ayay ugu horreeyaan. Dadka Soomaaliyeed si weyn ayay ugu indha furan yihiin fasiraadda sarbeebta suugaanaysan. Mararka qaar meel aan sarbeebi ku jirin ayay dadku sarbeeb ahaan u fasirtaan si ay ugu duwaan micnaha ay doonayaan ama meesha ay iyagu jecel yihiin. Waa halkii laga yiri “farta iyo meesha bugtaa is og”. Shaqo-suugaaneedda qiimaha lehna astaameheeda waxaa ka mid ah inay dadka siiso fursad ay kaga sii shaqaysiiyaan maskaxdooda iyo mala-awaalkooda.

Siyaalaha kala duwan ee suugaanleyda Soomaaliyeed sarbeebta u adeegsadaan, bulsha-weyntuna la baratay, waxaa ka mid ah in dalka iyo qaranimadiisa lagu qofeeyo ama lagu maldaho gabar aad u qiima badan oo la wada jecel yahay. Riwaayadda Xorriyo waxay raacaysaa waddadaas la isla yaqaan.

Xorriyo waxay u taagan tahay Soomaaliya, inta la safanna waa shicibka Soomaaliyeed iyo sama-taliska guud. Dhambaalka riwaayaddu siddo murtidiisu waxay ku ursursan tahay magaca abwaanku riwaayadda u bixiyey: ‘Xorriyo nin Gayaa ha Guursado’. Riwaayaddu waxay sarbeebaysaa ama si aan toos ahayn u sawiraysaa waddan kadeedan oo cadow u af

Copyright © 2010 WardheerNews

duuban, waddan ay hoggaankiisii xoogeen xuma-talis aan ahayn kuwii ay xaqa ahayd inay dadku u dhiibtaan. Xuma-taliskaas qolada riwaayaddu ula jeeddo su’aal baa ka taagan. Waxaa ka oogan dood soddon-jirsantay. Waxaa ka jirta laba fasiraadood oo is khilaafsan. Waxaan ku gorfayn doonnaa qaybaha dambe ee faaqidaadda.

Xilliga uu Maxamuud Cabdillaahi “Sangub” Xorriyo ku sawirayey dalkiisa oo kadeedan waxay ahayd 1980[kii.] Wuxuu ahaa xilli Soomaaliya ay ahayd dal dhisan oo hanaqaad ah; qaran dowlad leh, quruumaha dunidu ka haybaystaan, sharaf weynna ku dhex leh, walow ay jireen dhaliilo lagu diiddanaa dowladdii dalka maamulaysey. Marka la is barbar dhigo xaaladdii dalkan ee berigaas iyo tan uu maanta ku sugan yahay qofku wuxuu is oran karaa tolow abwaanku ma wuxuu saadaalinayey waxa maanta taagan. Ma wuxuu sii oddorasayey cawaaqib xumada ay dalka badi doonaan hoggaamiyeyaal aan ahayn kuwii ku habboonaa; kursi-jecel karti iyo daacadnimo labadaba ka arradan? Mise wuxuu ka hadlayey uun taariikh sii horreysey, sida aan dib ka arki doonno?

Xitaa hadduu taariikh ka hadlayey dad-xasuusinta taariikhdaasi ma waxay ka ahayd baraarujin uu ku sii saadaalinayey dareenka maanta taagan ee dadka Soomaaliyeed is weydiinayaan: tolow goormuu soo bixi doonaa hoggaamiye u qalma inuu caynaanka u qabto ummaddaan hoggaan-xumadu asaaggeed ka reebtay? ***Goormuu dhalan doonaa halyey “Xorriyo geya****”?*

Isweydiintaas xanuunka ku haysa xubin kastoo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed ayaa dib ii xasuusisay riwaayaddii Xorriyo iguna dhaqaajisay soo bandhigidda faaqidaaddan. Xorriyo waxay na xasuusisay hungada maanta laga fara maran yahay qaddiyaddii ay xambaarsanayd: waddan iyo xorriyaddiis iyo haybad qaranimo. Waxaa ka sii daran sida cirka loogu sii laalayo marba marka ka dambaysa iyo sida ayan u muuqan cid ku maqan hawlgal lagu soo celiyo, ka dib markii cadow aan dadka u wada muuqan karin uu dhiciseeyey hawlgalladdi badbaadinta ee hore la isugu dayey, kuwaas oo uu ugu weynaa hawlgalkii Jabuuti ee uu hoggaaminayey Ismaaciil Cumar Geelle, 2000.

Waxaa jira sababo muhiim ah ama ujeeddooyin iigu muuqday in laga faai’deysan karo soo bandhigidda qoraalkan waqtiga xaadirka ah. Marka la soo ururiyo, ujeeddooyinkaas i hawlgaliyey waxaa ka mid ah kuwan hoos ku taxan:

1. In da’yarta sawir laga siiyo, da’weyntana la xasuusiyo, sidii ay u ekaayeen riwaayadihii beri-samaadka iyo waddankii ay muraayadda u ahaayeen;

2. In qoraal lagu badbaadiyo, intii suurtagal ah, dhaxalkaas qaaliga ah ee sii dabargo’aya – dhaxalkii masraxa Soomaalida ee berigaas noqday muraayadda ilbaxnimada ummaddan intii aan la halligin;
3. In la muujiyo lana diiwaan galiyo ilbaxnimadii beri dadkani gaarey. Taas oo ay muuqato in uu soo dhow yahay waqti aan la rumaysan doonin, raadcadna laga hayn;
4. In la helo qoraallo qaan-gaar ah oo noqon kara tusaale looga tilmaan-qaato habka halabuurnimo ee loo xardho faaqidaad suugaaneed oo af-Soomaali ku qoran.

Copyright © 2010 WardheerNews

Tusaale-bixintani waxay si gaar ahaaneed ugu faai’daynaysaa da’yarta Soomaaliyeed ee ay ku duugan tahay hibada suugaaneed ee halabuurka qalinka, kuwaasoo baahi weyn u qaba qoraallo waaya-arag oo ay ku daydaan;

5. In dadka la xasuusiyo kaalintii muhiimka ahayd ee fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed iyo sidii ay bulshada u baraarujin jireen ugana digi jireen xuma-falka laga dhaxli karo cawaaqib-xumo dame.

Afeef ahaan, waxaa xusid mudan in aanan nasiib u yeelan inaan masrax ku daawado riwaayaddan Xorriyo xilligii la soo bandhigay. Faaqidaadda masraxuna waxay biya-kama-dhibcaan noqotaa marka ay ka dab-qaadanayso daawasho toos ah oo uu faaqiduhu riwayadda ku daawaday gole lagu soo bandhigay. Xogta aan faaqidaaddan u adeegsanayo waxaan ka soo dhirindhiriyey cajalado maqal ah oo riwaayadda lagu qabtay xilligii ay socotey. Waxaa ii wehelisa iftiimin aan ka kororsaday waraysiyo aan waqtiyo kala duwan la yeeshay (mahadi ha ka gaadhee) abwaanka riwaayadda curiyey, Maxamuud Cabdillaahi “Sangub” iyo qaar ka mid ah hormuudkii jilaageeda, sida Faynuus Shiikh Daahir iyo Cabdi Cali Baacalwaan. Isla xogtan dheegag ka mid ah waxaan asna ka xigtey qoraal qayb ka ahaa buuggii magaciisu ahaa ‘*Fan-masrexeedka Soomaalida: Raad-raac Taariikheed iyo Faaqidaad Riwaayado caan-baxay’* ee aan faafiyey 1987[kii.]

Xorriyo: Taariikh kooban iyo Tilmaan Guud

Xorriyo waxay soo if-baxday horraantii 1980kii. Waxay ahayd tii ugu magac dheerayd riwaayadihii sannadkaas soo baxay. Waxaa soo bandhigtay kooxdii Hoballada Waaberi, hormuudkii fanka Soomaaliyeed ee berigaas. Waxaa isugu tagey dhawr iyo labaatan jilaa oo wada caan ah. Waxaa safka hore kaga jirey Saado Cali Warsame (Xorriyo), Faynuus Shiikh Daahir (Gardarro), Maxamed Axmed Kuluc (Gama’diid), Cabdi Cali Baacalwaan (Sulub), Xaawo Caaji (Saxarla’), Saalax Qaasim Naaji (Sama-wade), Maxamed Cumar Huryo (Afdhabaandhab), Faarax Guuleed (Sibra-gooye), Cumar Rooraaye (Horseed) iyo mu’allifka riwaayadda, Sangub, oo qudhiisu jilitaanka qayb libaax ka qaatay, sida caadada u ah badi mu’allifiinta masraxa Soomaalida.

Halkii ugu horreysey ee lagu soo bandhigay waxay ahayd magaalada Boorame oo saddex habeen lagu celceliyey. Waxaa ku xigtey Gabiley, ka dibna waxay barrowsinka dhigatay Hargeysa. Halkaas oo lagu celcelnayey illaa 15 habeen, codsiga dadweynaha awgiis. Intaa ka dib riwaayaddu waxay u ambabaxday gobollada dhexe iyo kuwa koonfur. Waxaa laga dhigay magaalooyinka ku teedsan laamiga dheer ee Muqdishu taga, sida Burco, Laas-caanood, Garoowe, Gaalkacyo, Dhuusa-marreeb, Baladweyne illaa Buulo-burde. Halkaa markii ay maraysey ayaa waxaa magaalada Jawhar uga horyimid ciidan loo soo diray inay joojiyaan.

Muddadii ay soo socotey iyo magaalooyinkii laga soo dhigay, Xorriyo waxay la kulantay soo dhaweyn xad-dhaaf ah. Dadku waxay u xiiseeyeen si aan caadi ahayn. Halkii ay tagtaba waxay ugu tageysey ummaddii oo heegan u ah, qof kastaana sii diyaarsaday rikoodh uu ku duubto. Waxay noqotay waxa keliya ee afka lagu wada hayo. Waxaa laga sameeyey fasiraado kala duwan. Tan ugu weyni waxay ahayd in lagu tilmaamay

Copyright © 2010 WardheerNews

“riwaayad kacaan-diid” ah. Taas ayaa keentay in ciidan laga hor keeno oo dhexda lagu joojiyo. Fannaaniintii waddey ciidankii Jawhar ka soo galbiyey waxay toos u geeyeen xaruntii ciidamada, Afisyoone. Halkaas ayaa loogu dhigay Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre iyo masuuliyiintii ka hooseysey. Mu’allifku (Sangub) wuxuu ii sheegay inuu madaxweynuhu riwayadda fasaxay, hase yeeshee masuuliyiin kale ay ku adkaysteen inaan la dhigi karin. Wuxuu waliba intaa raaciyey in asaga nabadsugidda looga yeeray oo xabsi lagu xukumay, hase yeeshee uu xariggiisa diidey madaxweyne Maxamed Siyaad Barre.

Si kastaba ha ahaatee Xorriyo dib dambe looma soo bandhigin. Dadka ugu badan ee ay gaadhey waxay ku gaadhey cajaladihii daawatadu ku qabsadeen oo meel walba ku faafay, dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba. Joojintii la joojiyey iyo kacaan-diidkii lagu tilmaamay ayaa waxay abuureen xiise hor leh oo qof kastaa jeclaystay inuu mar uun indhaha saaro. Waxay noqotay hadiyadda ugu qaalisan ee loo diro dadkii joogey dalka dibaddiisa. Xorriyo waxaa lagu tilmaami karaa riwaayad cajalad yar lagu tabiyo tii ugu faafidda badnayd uguna caansanayd. Soomaalida magaala-galeenka ah ma filayo in uu ku jiro qof waqtigaas qaan-gaar ahaa oo aanu riwaayaddaas magaceedu si uun dhegtiisa ugu dhicin.

Caan-baxaas aan caadiga ahayn waxaa caawiyey xilliga ay ku soo beegantay oo ahaa xilli uu si weyn u xoogeystey dareenkii mucaaradnimo ee lagaga hor jeedey xukunkii Maxamed Siyaad Barre. Wuxuu ahaa xilligii ay soo baxday si weynna dadku u xiiseeyey suugaantii ka horjeeddey taliskii jirey; taas oo ay si bareer ah albaabka ugu furtay miinleydii caanka ahayd ee Khaliif Shiikh Maxamuud iyo silsiladdii ka dhalatay ee Hurgumo. Waxaa ka sii dhalatay silsiladdii Deelley ee sida weyn u shaac-baxday. Wuxuu ahaa xilligii ay bilowdeen jabhadaha hubaysan iyo hadaaqa mucaaradnimo ee lala wada bareeray, ka dib kolkii ay dabacday gacantii birta ahayd ee taliskii milatariga ahaa.

Mar kale si kooban, laba sababood ayaa loo aanayn karaa caan-bixiddii Xorriyo. Tan hore waa mamnuuciddii dowladdu mamnuucday iyo micnihii siyaasadeed ee dadweynuhu u fasirtay. Waxaa muuqata ujeeddaddii mamnuuciddaas laga lahaa in ay cayn-wareegtay ama isu rogtay dhanka kale (Cagsiga). Tan labaad, oon qudheedu taa hore ka durugsanayn, waa mowduuca riwaayadda oo dacal ka xadanteeyey dareen dadweynaha ku jirey. Waxaa laga dhigtay fursad la isaga neefiyo naqaskii dhaliilidda xukunka jira, ee in badan dadka lagu cabburinayey!

Waa kuma “Sangub”, mu’allifka Xorriyo?

Maxamud Cabdillaahi Ciise “Sangub” ama “Singub” (sidii yaraantiisii lagu naanaysi jirey) wuxuu safka hore kaga jiraa abwaannada ugu caansan taariikhda fanka Soomaaliyeed. Waa abwaan lagu mannaystay hibooyin badan oo is huwan. Waa ciyaartoy, maansayahan, riwaayad-curiye, jilaa, muusig-sameeye iyo majaajilleeye. Waa waddani u dareen nugul danta guud ee dalkiisa iyo dadkiisa. Waa nin miyi ku soo barbaaray dabeedna magaaloobay, sidaa awgeedna aan labada dhinac midna wax weyni ku seegganayn. Wuxuu ku dhashay miyiga Dhagax-buur 1944kii. Tacliintiisii ugu horreysey waxay ahayd dugsi-quraan. Sagaaljir ayuu Quraanka ku dhammeeyey. Isla

Copyright © 2010 WardheerNews

da’daas ayuu ku bilaabay ciyaartoynimo waana wixii ugu horreeyey ee uu ku caanbaxay. Bilowgii dhallinyaranimadiisa wuxuu ahaa geel-jire geesi ah, aad isula weyn, dadka ku maaga heesaha ciyaarta, u haysta guud ahaan Somaalida, gaar ahaanna reerkiisu inay ugu sarreeyaan khalqiga Ilaahay uumay. Halkaa ayuu ka bilaabay maansa-tirinta.

Sangub wuxuu ku barbaaray degaan maansada si weyn looga qiimeeyo oo dadka oo dhammi yihiin maanseeye iyo maansa-dhaari. Gaar ahaanna qoyskii uu asagu ka dhashay wuxuu ahaa qoys wada gabayaa ah. Abtigiis wuxuu ahaa gabayaagii caanka ahaa, Ismaaciil Xayd “Aflow”. Waa ninkii uu Tima-cadde ku halqabsan jirey ee uu oran jirey “Mudanihii Aflow iyo sidii Muxumad maw sheegay”. Walaalihiis badankoodu, rag iyo dumarba waa maansaley. Waxaa ka mid ah Axmed Faraddar, Fakad, Muxumad-Wali iyo Cibaado.

1961kii ayuu yimi magalada Hargeysa asagoo ah *mudawar* dhaanto u dibad-baxay. Wuxuu watey koox ciyaar-toy ah. Wuxuu la kulmay fannaaniin iyo suugaanley ay ka mid ahaayeen Maxamed Axmed, Maxamed Cumar Huryo iyo Cabdillaahi Xamari. Waxay la yaabeen waxa afkiisa ka baxaya. Waxay u geeyeen Cabdillaahi Ayuub iyo Raadio Hargeysa. Wuxuu ku gulaystey imtixaan looga qaaday inuu idaacadda ka shaqeeyo, kumase nagaane wuxuu u sii tallaabay xaggaas iyo Muqdishu. In muddo ah ayuu ka mid ahaa dhallinyaro ka gabayda fagaarayaal ay ka mid ahayd xaruntii Xisbigii loo yiqiin Gareedka, illaa markii dambe laga shaqaaleeyey Radiyo Muqdishu.

1964kii markii uu qarxay dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiya ayuu wuxuu ka mid noqday suugaanleydii lagu asaasay kooxdii Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Halkaas ayuu ku gaamuray fannaan ahaan, kuna soo caanbaxay mu’allif ahaan iyo jilaa ahaanba. Sangub Indha-dillaacsigiisii reer-magaalnimo iyo kiisii halabuurnimoba waxay ku soo beegmeen xilligaas oo ahaa xilli baraarugga Soomaalida iyo qiirada waddaninimo labaduba marayeen heerkii ugu sarreeyey. Sidaa awgeed, riwaayadihiisii ugu horreeyey waxay ahaayeen waddani, sida aad ka garan doontaan magacyadooda. Wuxuu ku bilaabay ‘*Naga guur’* (1964) oo uu kula doodayey gumeystaha. Waxaa gacan ka siiyey Cismaan Aadan Askari, waxaana soo bandhigtay kooxdii Xoogga Dalka. Riwaayaddiisii labaadna waxay ahayd ‘*La mood noqonse weydey*’ (1965). Wuxuu ula jeedey dhabarjabintii lagu dhiciseeyey aftidii xornimada NFD 1965kii.

1971kii wuxuu ka mid noqday asaasayaashii kooxdii Qaranka, *Hooballada Waaberi*, ee ka dhalatay isku darkii labadii kooxood ee Radiyo Muqdishu iyo Xoogga Dalka. Ka dibna muddo labaatan sano ku dhow ayuu safka hore kaga jirey abwaannada ugu caansan uguna riwaayado badan masraxa Soomaalida. Wuxuu curiyey in ka badan 30 riwaayadood, waana tirada ugu badan ee ka soo maaxatey maskaxda mu’allif Soomaalyeed. Riwaayadihiisa aad u caan-baxay oo dadku wada yaqaaniin waxaa ka mid ah *Yaxaas-dhega-duub (*1968), *Xuud baa Liqay Jacaylkii* (1974), *Qabrigii Jacaylka* (1975), *Xorriyo* (1980), *Waa maadeys Adduunyadu* (1985kii), *Ninba Tacabkiis Taloy kaa Maal* (1988), *Haysku Toosin Belaayo Nimay taaban Allaa Oge* (1989) iyo *Qabyo* oo ah sisilad weli socota ahna riwaayadda ugu weyn uguna caansan ee soo baxday muddadii

Copyright © 2010 WardheerNews

burburka. Sangub wuxuu kaloo curiyey boqollaal hees oo jacayl u badan iyo gabayo fara badan oo waddani u badan.

Nasiib-darro, abwaan Sangub, oo ah hormuudka masraxa Soomaalida, illaa sagaashannadii qarnigii tagey wuxuu ka mid ahaa qurba-joogta qaxa la baday, wuxuuna u badnaa Woqooyiga Ameerika.

Qisada riwaayadda

Silsiladda dhacdooyinka riwaayadda waxaa saldhig u ah colaad ka dhex oogan laba dhinac oo is haya: dhinac shar-wadeen ah iyo mid xuma-diid ah. Qolada hore waxaa mayalka u haya islaan la yiraahdo Gardarro (Faynuus Shiikh Daahir) iyo afar wiil oo ay dhashay. Qolada labaadna waxaa hormuud u ah gabar lagu magacaabo Xorriyo (Saado Cali Warsame) iyo eheladeeda.

Qisada riwaayaddu waxay ku furmaysaa Gardarro iyo wiilasheeda oo ka shiraya qorshohooda mustaqbalka. Waxay isu sheegayaan inay ku yaraatay goobtii ay degganaayeen iyo inay ku fillaan waayeen wixii ay haysteen. sidaa awgeed waxay isla qireen inay u baahan yihiin dhul cusub oo ay isku fidiyaan. Waxay go’aansanayaan inay u guuraan meel ay ku tilmaameen “Geeska Madow”. Gardarro waxay wiilasheeda ku guubaabinaysa inay “dunida qasaan”, “dadka isku diraan”, u xoog sheegtaan, dumarka la qabo soo dhacaan. Xorriyo oo aan waxba galabsan ayaa qorshahaas lagu fulinayaa. Waa la soo dhacayaa. Waxaa khasab ku guursanaya afar nin oo walaalo ah. Eheladeedii ayaa falkaas xun ka anfariiraysa. Labadii dhinac ayaa dagaal afka ah foodda is daraya. Qoladii gabadha boobtay waxay ku dadaalayaan inay kala xadaan oo qaar laaluush ku iibsadaan qoladii gabadha. Col uu hoggaaminayo nin lagu magacaabo Afdhabaandhab (Huryo) oo bilowga hore dacwad la waajahaya qolada gabadha boobtay ayaa marka wax la siiyo si dadban u taageeraya raggii gabadha ka xoogey. Waxay isku dayayaan inay qaboojiyaan oo hubka ka dhigaan kooxda kale ee xanaaqsan:

AF-DHABAANDHAB: “*Inantii rag baa qaba aaney cidina rogi Karin … War maxaa idin rabbushaya! Caga-dhigta*!”

Kooxda kale warkaas ma qaadanayaan. Waxay ku taamayaan aar-goosi. Sulub (Baacalwaan) oo afkooda ku hadlayaa waan kan leh:

Annagoon raalli ka ahayn
Ninka dagey rugteennii
Ruqiyana ku guursaday
Dumaal uu rag leeyahay
Gardarrada ku raadsaday
Haddaan laysla ruux bixin
Midkeen rubadda laga jarin
Raganimo maxay tahay?

Copyright © 2010 WardheerNews

Loollanku wuxuu sii kululaanayaa marka ay toos isu waajahaan labadii hooyo: Saxarla’ oo Xorriyo hooyadeed ahi marka ay toos ugu bareerto Gardarro oo ah islaantii kibirka iyo xoog-sheegadka abbaan-duulaha u ahayd.

SAXARLA’: Gardarro aan lala dhuuman
Lala soo gabbanayn iyo
Gef ma qaadan karaayoo
Anigu waan ka gubtaa.
. . . .
Intaan dhiig gobo’laynin
Ma geydaan gabadhaydee
Gogoshiina ka qaata!

GARDARRO (oo kibir iyo ku jeesjees isu qoslaysa):
Gulufkiyo colaaddaan
Waqay garabka siiyaa
Gefka waan ku naaxaa
Garowshiinyo ma oggoli.
Gardarrada sideedaba
Anigaa go’a u xira.
Gabar aan nin kale qabin
Wiilkay ma guursado.
Kaagu geela inuu jiro
Kayga iyo gabadhuna
Guriga ay dhex joogaan
Ayey talo ku go’an tahay.
Gaabisaye maxaad qaban?
Gurxantaye maxaad tari?

Gardarro gooddigaas iyo gacan-sarrayntaas ay ku hanjabayso muddo aan yarayn ayay u soconayaan. In badan ayay iyada iyo wiilasheedu ku amar-ku-taaglaynayaan Xorriyo iyo inta la hal-maahsa, kuwaas oo in muddo ah ku jiraya kala-daadsanaan iyo waxqabad-xumo. Dumarka ayaa ragga ka firfircoon oo mar walba guubaabo iyo canaan la dul-jooga, sida marka ay Haweeya Hoobaan ku leedahay:

Naa waa kanoo rag ma haynnee
Hawshii aannu lahayn iyo
Ubadkii ha hayeene
Halgan aynnu bilowno!

Saxarla’ oo si xun uga qalbi-jabsan waxqabadla’aanta raggooda waa tan gabadheeda, Xorriyo, ku leh: “Hooyo rag ma lihid Rabbi baadse leedahay!”

Hayeeshee raggii, wax la kala xado oo ay iska habacsanaadaanba, ugu dambaynta waxay awood u yeelanayaan inay si wacan isu abaabulaan. Hawlgal weyn ayay ku

Copyright © 2010 WardheerNews

tallaabdsanayaan. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Gardarro oo Xorriyo ku jeesjeesaysa la hareeraynayaa. Waxay ku argagaxaysaa Gurdan iyo sawaxan, guluf hubkiisu u dhanyahay oo geesigii hoggaaminayey kaga dul geeraarayo:

Waxay mala sawaashoo,
Sahankeedu baaqoo
Salbacaad ku oontoo
Sabigeedu ooyaba
Saakiyo nasiibkeed
Soo gaadhey guushii.

Waqtigii ku sugi jirey
Inuu saaka kaa dhacay
Sasaankaad ka garataa.

Suxulkiyo lugta is xiga
In lagaa sifeeyaa
Taladu ay ku sugan tahay.

Intaa marka uu yiraahdo ayuu amar ku bixinayaa in lug iyo gacan is xiga laga jabiyo. Qacdii iyo baroorteedii ayaa cirka isku shareeraya. Wiilasheedii bay u habar wacanaysaa. Way u soo gurmanayaan waxse uma qaban karayaan. Halkii ayaa iyagana lagu hareeraynayaa oo iyagoo maxaabbiis ah laga taxaabayaa. Xorriyo iyo eheladeedii oo wajigooda farxadi ka muuqataana way ku dul mashxaradayaan.

Raggii dumarku dhaliili jireen ayaa helaya isku kalsooni ay ku dhiirradaan hadal iyo haasaawe ay la hortagaan gabdhihii eedaynta iyo canaanta la dul joogi jirey:

RAGGII: *Sida dhool guyoo da’ay*
Ama dhayda caanaha
Hablyohow dhalaalee
Dhabannada qurxoonow
Sidii hore ma dhaannaa?

GABDHIHII: Maantiyo dharaartii
wax weyn baw dhexeeya.
Hayeeshee dhallaankii
Dhiishu uma ay buuxsamin
Ma dhargine ogsoonow.

RAGGII: Naa saar-lugeed ma dheellaa
Dhaantana ma tumannaa
Dhafandhaafka sheekada
Maysu soo dhawaannaa?
Dhunkashada ma barannaa?

Copyright © 2010 WardheerNews

Dhuunta ma idin taabtaa?

GABDHIHII : Horta dhudi ma joogtaa?
Sidigtii ma dhaqantahay?
Dhool ma soo xerayseen?
Dhaameel ma keenteen?
Dhiilkii ma loo culay?”

Shantii halaad ee ay weydiineysey ayay midba mar u yeer-yeeraysaa:
“*Dhudi Dhudi Dhudi Dhudi!! Dheeg Dheeg Dheeg!!”*
Laba ayaa la helayaa oo soo baxaya, seddexna waa la waayayaa.

Markaas ayay gabdhuhu ragga ku oranayaan:
Waar inta dheehi maqan tahay
Dhudi ay dibbood tahay
Dheeg aan la soo hoyn
Dhawaaqaaga sheekadu
Nooma dhaadhacaysee
Waa inoo dharaar kale.

Riwaayadda waxaa lagu gunaanadayaa muuqaal qurux badan, gabdhihii soo halgamay oo iyagoo si wacan u labisan masraxa ka dhex nuuraya, iyo Saalax Qaasim oo u qaadaya heesta caanka ah ee halkudheggeedu yahay “Gobsanaa hablahayagu.”

Fikradda riwaayadda: maxay tabinaysaa Xorriyo?

Shaqo-suugaaneed kasta (riwaayad, gabay, sheeko, iwm) waxay leedahay laba dhinac oo laga qiimeeyo: fikrad iyo farsamo – waa fikradda ay xambaarsan tahay iyo farsamada ay adeegsanayso si ay fiktraddaas dadka maskaxdooda u galiso. Fikraduhu way kala dhumuc weyn yihiin, farsamooyinkana waa la kala qurxin og yahay. Faaqidaaddan waxaan ku darsaynnaa labadaa dhinac midba waxa ay naga tusayso riwaayaddan Xorriyo. Waxaan ku hor maraynnaa fikradda riwaayadda ama *arrimaha* ay ka hadlayso.

Xorriyo waxaa lagu tilmaami karaa riwaayad hadaf leh, riwaayad dhambaal sidda, riwaayad taariikheed, siyaasadeed. Qisadeeda waxaa saldhig u ah loollan laba dhinac oo is haya, sidii aan hore u xusay. Waxay ku kala abtirsadaan shar-wadeen iyo xuma-diid. Falsafad ahaan, fikradda riwaayadda tiir-dhexaadka u ah waxay salka ku haysaa loollanka soo-jireenka ah ee mar kasta iyo meel kasta ka dhex oogan samaha iyo xumaha, ama sharka iyo khayrka. Tan iyo waagii bini-aadmigu hindisay fanka riwaayado-samaynta, mowduucani wuxuu ahaa udub-dhexaadka mu’allifiintu ka dul dhisaan riwaayadohooda.

Ka soo bilow Giriiggii hore, oo ah qolada aan lagu haysan aabbenimada fan-masraxeedka maanta lagu dhaqmo. Waa jid-bixiyeenkii laga soo gaarey. Riwaayadohoodii ugu horreeyey mowduucii ay ku bilaabeen wuxuu ahaa loollan ay dhex dhigi jireen wixii ay iyagu u yiqiinneen ilaaha roobka iyo kan abaarta. Kan hore wuxuu u taagan yahay

Copyright © 2010 WardheerNews

samaha kan labaadna xumaha. Loollanka labadaa ruux, dibirta hore waxay ku dhici jirtay ilaaha roobka, kolkaas ayay daawatadu murugoon jirtay, maxaa yeelay mar haddii samihii laga adkaaday wixii la fishaaba waa hoog iyo abaar. Ka dib ayuu ilaaha roobku (sidii ay rumaysnaayeen) intuu soo dhibib kaco afka ciidda u dari jiray cadowgiisa. Guushaas ayaa soo celin jirtay farxaddii daawatada. Halkaas ayaa damaashaad laga bilaabi jiray (saadaal roob iyo sannad barwaaqo).

Heerka guud Xorriyo waxay ka tarjumaysaa falsafad-nololeeddaas ku dhisan loollanka xumaha iyo samaha. Marka hoos loo soo dego ma adka in la fahmo dulucda riwaayaddani inay tahay siyaasad lagu maldahayo suugaan-bilayaal toolmoon. Suugaan-bilayaashaas (oo aan dib ka falanqayn doonno) sarbeebta ayaa ugu weyn. Qofafka (charecters) riwaayaddu ku socoto iyo hadallada ay is weydaarsanayaan labaduba way sarbeeban yihiin; haddii si kale loo yiraahdo, waxaa ku dahsoon wax ka duwan waxa dusha ka muuqda.

Hawraareey ninba si kuu qaadey

Sidii aan hordhaca ku xusay, suugaanleyda Soomaaliyeed waxaa caado u ah inay dalka iyo qranimadiisa ku qofeeyaan ama ku maldahaan gabar aad u qiima badan. Caadadaas waxaa xoojiyey cabburintii fekerka xorta ah ee ay halabuurka ku cabsi-galin jireen dowladihii kala dambeeyey, siiba maamulladii gumeysiga iyo kii Maxamed Siyaad Barre. Maadaama sidaa loo bartay daawatada riwaayaddu way fahmayaan Xorriyo inay u taagantahay dalka iyo xornimadiisa. Daawato ahaan waxaan kaloo si fudud u fahmaynnaa qolada Xorriyo af-duubtay in loola jeedo cadow dalka dadkiisii ka xoogey (muquuninta Xorriyo) falal xunxun oo ka xaaraan ahna kula kacaya (afarta nin ee Xorriyo khasabka ku guursanaya). Waxaa kaloon fahmaynnaa qolada ka horjeedda ee Xorriyo u hiillinaysaa inay u taagan tahay shacbiga Soomaaliyeed. Intaas fahamkeedu wuu fududyahay. Hayeeshe waxaa jirta mid aan fududayn. Waa fasiraad murankeedu taagan yahay tan iyo maalintii Xorriyo soo if-baxday.

Inanta Xorriyo ah iyo eheladeeda iyaga doodi kama taagna. Waxse laysku diiddan yahay Gardarro iyo wiilasheeda cidda loola jeedo. Qolo waxay leedahay waa gumeystayaashii Soomaalida xoogga ku qabsaday ee midba cad goostay. Qolo kalena waxay u fasiratay askartii dalka xoogga ku qabsatay iyo keli taliskii ku amar-ku-taagleeyey. Tan dambe ayaa loo batay. Bulshaweyntu dhankaas ayay riwaayadda la aaddey. Waa sababta keentay inay dowladdu mamnuucdo dadweynuhuna jeclaado ee cajaladaha ku boobo. Waa sababta ay u caan-baxday. Labada fasiraadood kee baa dhab ah? Su’aashaas waxaa la weydiiyey mu’allifka riwaayadda. Wuxuu si cad ugu jawaabey tan hore ayaa sax ah. Wuxuu ku adkaystay riwaayaddu *waxa* ay ka hadlaysaa in ay tahay taariikh hore, taariikhdii gumeysiga shisheeye iyo sidii uu u boobay xornimadii Soomaaliya. Hayeeshee cidi dheg uma jalaq siin jawaabta abwaanku bixiyey.

Dowladdii jirtey iyo dadweynuhuba waxay ku adkaysteen fasiraadda labaad. Waa sababta dowlddu ugu adkaysatay mamnuuciddii Xorriyo. Su’aashii iyo mar kale : labada fasiraadood tee baa dhab ah ? Jawaabtii curiyaha haddii lagu qanci waayey, haddii loo

Copyright © 2010 WardheerNews

qaatay inuu runta ka cabsaday, su’aasha aan ula tagno riwaayadda qudheeda. Markaan shillalka saarno, kala shaandhayno, shishe iyo sokaba indhaha ku shiishno, waxaa noo soo baxaysa jawaabta dhabta ah. Waxay noqonaysaa sida soo socta:

Gardarro iyo colkeedu labada qolo ee loo kala qaatay labadaba way noqon karaan. Waa astaan lagu yaqaan suugaanta hanaqaadka ah inay yeelato mug ay ku qaadi karto micnayaal kala duwan. Taa marka laga tallaabsado, mu’allifku dhankiisa jawaabta uu bixiyey ma aha mid ay cabsiyi ka keentay. Waa midda dhabta ah, asaga dhankiisa. Waa run inuu shiishka ku hayey quwadihii isticmaarka. Gardarro iyo afarteeda wiil wuxuu la beegsanayey afartii gumeyste ee Soomaalida u heshiiyey iyo shantii qaybood ee ummaddaan loo kala jaray. Gardarro waxay ugu qofaysnayd gumeysiga guud ahaan. Afarteeda wiil ee uu hormuudka u yahay Sibra-gooye (Faarax Guuleed) oo loola jeedey Ingiriiska, waxay kala matalayaan Ingiriis, Talyaani, Faransiis iyo Itoobiya. Dadweynuhu dhankooda islaantan iyo afarteeda wiil waxay u fasirteen Maxamed Siyaad Barre iyo afartiisii kaaliye ee ku wehelisey hoggaankii ugu sarreeyey dowladdii kacaanka. Maxaa caddaynaya shanta Sangub u jeedey in aaney shantan ahayn balse ay ahaayen shantii Soomaalida kala qaybsatay? Riwaayaddu waxay na siinaysaa tusaalayaal fara badan. An isla eegno qaar ka mid ah:

Kow, muuqaalka riwaayaddu ku furmayso, shirka ay ku tashanayaan Gardarro iyo wiilasheedu erayada ay isticmaalayaan way ku caddahay in loola jeedo shirkii caanka ahaa ee waddammada Yurub ay Berlin ku isugu tageen 1884[kii]. Halkaas oo ay ku go’aansadeen inay Afrika qabsadaan oo kala qaybsadaan, ka dib markay is tuseen in aaney ku fillayn qaaraddooda yar ee khayraadkeedii gabaabsiga yihiin:

SIBRA-GOOYE: *Hooyaday gacaloy*
Hadal aanu gorfaynay baa
Go’aankiisu ahaa
In geedkaan harsanaynno
Gaasirmeen mirihiisii
Guntiisiina yaraatay
Ee meesha aynu u guuri
Ee gogosha aad dhiganayso
Aduun baa garanaaya.

GARDARRO: *Hooyo geeska madow baa*
Lagu sheegay gayaan iyo
Gabdho aad u wanaagsane
Waa inaynu u guurroo
Gogosha aan fidsannaayoo
Ka gufeyno danteenna.

Laba, marka Baacalwaan leeyahay “annagoon raalli ka ahayn, ninka dagey rugteennii, ruqiyana ku guursaday” way muuqataa in laga hadlayo nin shisheeye ah oo soo degay dad kale dhulkood, ka dibna waxoodii boobay. Afarta nin ee u heshiiyey gabadha aan

Copyright © 2010 WardheerNews

waxba galabsan iyadana waa la fahmi karaa in loola jeedo afartii isticmaar ee Soomaalida u heshiiyey.

Tan kale, marka ay Xorriyo leedahay:

Maantiyo dharaartii
Wax weyn baw dhexeeya.
Hayeeshee dhallaankii
Dhiisu uma ay buuxsamin
Ma dhargine ogsoonow.

Waa la fahmi karaa micnuhu inuu yahay xoraynta gayiga Soomaaliyeed, tallaabo wanaagsan ayaa hore loo qaaday maadaama qaybihii shanta ahaa laba la xoreeyey, haseyeeshee guushu waa qabyo illaa saddexda kalena la xoreeyo. Dooddaas habluhu waxay si buuxda daaha uga rogayaan marka dambe ee ay ragga ugu jawaabayaan:

War inta dheehi maqan tahay
Dhudi ay dibbood tahay
dheeg aan la soo hoyn
Dhawaaqaaga sheekadu
Nooma dhaadhacaysee
Waa innoo dharaar kale.

Waliba gunaanadka dambe sheekada waxaa loo sii qaawinayaa si aan loo baahnayn, marka ay gabadhu u yeeryeerayso shantii halaad ee laba ay soo baxayso saddexdii kalena la waayayo. Halkan waxaa la is weydiin karaa sababta tirada maqan saddex looga dhigay, maadaama waqtiga riwaayadda la dhigayo oo ahaa 1980[kii] ay Jabuuti xor ahayd. Haseyeeshee mu’allifku wuxuu ii sheegay waqtigii uu riwaayadda diyaariyey inuu ahaa 1971[kii] balse dhigisteeda dib loo dhigay illaa 1980[kii] oo ku beegnayd toban-guuradii kacaankii uu hoggaaminayey Maxamed Siyaad Barre.

Dhanka kale haddaan u rogno, fasiraadda labaad ee ah Gardarro iyo wiilasheeda in loola jeedey Maxamed Siyaad iyo Golihiisii Sare ee Kacaanka, iyada qudheeda riwaayadda waa laga helayaa meelo markhaati looga dhigan karo. Way jiraan meelo loo fasiran karo cidda farta lagu fiiqayaa inay tahay madaxdii markaas haysey hoggaanka waddanka.

Tusaale waxaa ah qolada loo xoog-sheegtay marka ay tilmaamayaan dulmiga iyo dhibaatada taagan, ee ay is weydaarsanayaan haasaawaha soo socda ee lagu sarbeebayo warqadaha turubka:

Siddeedlaha Sagaallaha hadhiin, saaniga u ridaya
Raanida Sabooshee lixluhu, sabansabdhaynaayo
. . . . . .
Ishan saxarka laga bixin kareen, laga samaynaynin
Salaad aan niya ahayn gacmaha, la isa saaraayo
Siyaasada ninkii qori leh uun, saaran guradiisa
Siday noqon?

Copyright © 2010 WardheerNews

Erayadaan tilmaamaya nin aan shalay waxba ahayn maantana dadkii ka awoodda badnaan jirey ku amar-ku-taaglaynaya, (Siddeedlaha sagaallaha hadhiin saaniga u ridaya), kuwa muujinaya munaafaqnimada iyo laba-wajiilaynta (Salaad aan niya ahayn …. kwd) iyo kuwa tilmaamaya xukunka ninkii qori haystay maroorsaday (siyaasada ninkii qori leh uun, saaran guradiisa) intaa oo dhan iyo in kaloo badan oo lagu sarebeebayo murti koobkooban, waxaa loo fasiran karaa duur-xul lagu far-fiiqayo xukunkii askarta ee qoriga caaraddiisa ku yimid kuna dhisnaa. Haddii fasiraaddaas la qaato labada dhinac ee is hayaa waxay u muuqanayaan taliskii jirey iyo shacbi-weynaha.

Dhawr arrimood ayaa u sabab ah inay fasiraaddani ka xoog badato tii uu ku talagalay abwaanka riwaayadda sameeyey. Tan koowaad waa dabeecadda sarbeeb-doonka ah ee ay leedahay suugaan-jecesha Soomaaliyeed. Sidii aan hore u sheegay, goor walba suugaanta waxaa laga daydayaa ujeeddo dahsoon oo loo duurxulayo. Tan labaad, riwaayaddu waxay ku soo beegantay xilli diidmamada xukunkii jirey ay ku xoogganayd dareenka dadweynaha, loona oommanaa suugaan la jaan-qaadda dareenkaas mucaaradnimo. Waa tii aan lahayn “farta iyo meesha bugtaa is og”. Soomaaliyadii 1980ka dadkeeda “meeshii bugtey” ma ahayn “gumeysi” hore, balse waxay ahayd xukunkii xilligaas taagnaa oo dadku ku dhaliilayey kelitalisnimo iyo musuqmaasuq. Meeshaas bugtey ayaa lala doontay fartii riwaayadda, si weynna way u taabatay.

Taabashadaas iyo tafsiirta noocaan ah waxaa caawiyey riwaayadda oo (sidaan hore u sheegnay) ku dhisnayd sarbeeb iyo suugaan maldahan oo sida “margiga” u jiidmaysa marba dhankii loo weeciyo. Dadku xaq bay u leeyihiin suugaanta inay u fasirtaan marba sida ay iyaga ugu dhadhanto.

Xorriyo iyo mu’allifkeeda waxaa jira laba qolo oo marka aan loo fiirsan la moodayo inay wax u dhimeen, hayeeshee aan wax u dhimin balse wax u taray, iyagoon ku talagalin. Waa dowladdii riwaayadda mamnuucday iyo dadweynihii ka weeciyey ujeeddadii abwaanku ugu talagalay. Labaduba waxay sababeen Xorriyo inay noqoto riwaayad taariikhda gashay, dadka saamayn weyn ku reebtay, degdegna u caan baxday. Abwaanku wuxuu ku ammaanan yahay awoodda uu u yeeshay falkinta riwaayad abuuri karto aragtiyo sidaa u kala duwan; riwaayad u adeegi karta himilooyin ka sii qota dheer kuwii loogu tala galay.

Shaqo-suugaaneedda taabbaggalka ah waa tii yeelata moolal iyo baacyo aan u wada muuqan xataa hal-abuurkii curiyey, illaa ay ku baraarujiyaan faaqideyaashu. Shaqada fanku (riwaayad, filim, sheeko iwm) waa shay nool oo isugu rakiban si aan fududayn, marka la falanqaynayana lagama amba qaado waxa curiyuhu ka sheego ee waxaa laga amba qaadaa waxa ay iyadu sheegayso ee laga fahmo iyo dareenka ay dadka ku dhaliso.

Farshaxanka riwaayadda iyo Suugaan-bilayaasha loo adeegsaday

Haddaan u gudubno dhankii farshaxanka, ama farsamooyinka (techniques) mu’allifku u adeegsaday falkinta riwaayaddiisan, way badan yihiin. Masraxu sidiisaba waa murti iyo

Copyright © 2010 WardheerNews

muuqaal. Riwaayadda dhammayska ahi waxay ka dhisantaa is buuxinta labadaas dhinac oo si wacan la isugu dhafay. Murtidu waa nuxurka luqadda ama erayada ay ku wada hadlayaan dadka riwaayaddu ku socoto. Muuqaalkuna waa waxyaalaha ay qabanayso isha daawatadu ee kaabaya waxa lagu hadlayo. Waxaa ka mid ah dhaqdhaqaaqa matalayaasha, dharka ay xiran yihiin, muujinta shucuurtooda, goobta wax lagu jilayo iyo agabka yaalla, diikoorka ama muuqaallada xagga dambe, adeegsiga iftiiminta iwm. Waxaa sii kaaba muusigga iyo shanqaraha kale ee ku dhacaya dhegta daawatada. Heerka saamaynta riwaayadi ku yeelato dareenka daawatada waxay ku xirantahay marba hannaanka loo dhiso la isuguna dhafo, intaa aan soo sheegnay iyo erayada lagu hadlayo. Waa inuu noqdaa hannaan dadka illowsiiya inay riwaayad daawanayaan, hannaan midab-roga maanka daawata ee gaarsiiya inay is moodsiiyaan waxa hortooda ka muuqdaa inay yihiin wax dhab ahaan u dhacaya.

Masraxleyda Soomaaliyeed guud ahaan waa ka sabool adeegsiga muuqaalka. Waxay xoogga saaran uun dhinaca murtida ama waxa lagu hadlayo. Meelaha muhiimka ah tix ayay ku tabiyaan – hees ama haasaawe tixaysan. Sababta ay xoogga u saaraan xagga hadalka uun waxaa loo aanayn karaa bulshadeenna oo badi ka soo jeedda dhaqanka reer guuraaga oo badiyaaba dheg-maal ah. Fanka muuqaalka waxaa hore ugu mara bulshooyinka deggen ama ka soo jeeda degaan aan laga guurin (beeraley, beled-ku-nool iwm). Soomaalidu waxay caan ku tahay hodontinimo heer sare ah oo ay ka gaareen waxa loo yaqaan fanka erayga (verbal art), fankaas oo ay hormuud u tahay tixdu ama maansada noocyadeeda kala duwan. Waxaa kaloo ka mid ah tiraabta murtiyaysan, maahmaahda, iyo heesaha hiddaha oo qudhoodu ku abtirsada fanka maansaynta.

Halabuurka suugaanta curiyaa waa hormuudka hodoneeya hiddahaas afmaalnimo. Maxamuud Cabdillaahi Sangubna hormuudkaas ayuu u yahay tusaale nool. Fanka erayga wuxuu u leeyahay hibo aan caadi ahayn, fanka muuqaalkase Soomaali buu ka yahay. Dhab ahaan riwayadihiisii Xorriyo ka horreeyey, sida Qabrigii Jacaylka, saami weyn ayay ku lahaayeen adeegsiga muuqaalka, marka loo eego masraxa Soomaalida. Haseyeeshee Xorriyo dadaal badan muu galin dhankaas muuqaal-adeegsiga. Wuxuu quwadda dul dhigay dhanka murtida, xardhidda erayada iyo xikmadaynta weedhaha. Dhankaas ayuu ka muujiyey wacdaro farshaxanimo.

Suugaan-bilayaasha Sangub adeegsanayo waxaa si weyn uga muuqda raadkii ay ku reebtay baya’ddii uu ku soo barbaaray, degaankii miyiga ee hodonka ka ahaa murtida iyo maansada, geeluna ka ahaa hantida ugu qaalisan. Haasaawaha riwaayaddu waa wada murti iyo maanso. Hummaagyada suugaaneedna waxay ku wada aroorayaan geel iyo nolol miyi. Shanta halaad ee loo bixinayo magacyadii geela Soomaalida: dheeg, dhaameel iwm; dhulalka maqan oo laga dhigayo geel la dhacay oo ay tahay in la soo dhiciyo (waa sarbeeb ku badan suugaanta Soomaalida). Waxaa riwaayadda ka buuxa erayada astaanta u ah luqadda reer guuraaga. Kuwaas oo ay ka mid yihiin ‘dagel’, ‘sidigta’, ‘dhiilkii ma loo culay’; ‘gudcurkana caddaa xigi’, ‘geeddigan ujeeddada leh ee raadka loo gadayo’; erayga ‘geeddi’ aad ayuu ugu soo noqnoqonayaa haasaawaha riwaayadda.

Copyright © 2010 WardheerNews

Farsamooyinka kale ee mu’allifku adeegsanayo, kana soo jeedaa sooyaalka Soomaalida, waxaa ka mid ah sarbeebta, kajanka, gogaaleysiga, faalka, xiddigiska, shaxda ama turubka, halxiraalaha, ciyaaraha hiddaha, tixaynta iyo xaraf-raaca. Intaas oo idil riwaayadda Xorriyo taako-taako ayay ugu taxan yihiin, waxayna ka mid yihiin xeeladaha Sangub riwaayaddiisa ku jeclaysiiyey dadkii ay gaadhey. Sooyaalka la isla yaqaan oo lagu shubto fikrado cusub waa waddada ugu dhow ee suugaanluhu u maro hanashada maskaxda iyo maanka dadweynaha. Faai’dada kale, sooyaalkii hore marka boodhka laga tumo, marka la soo fago ee lagu dhex sooho suugaan cusub, waxay u noqonaysaa soo noolayn iyo xafidaad ka ilaalisa in la illaawo.

Sangub wuxuu ku guulaystay in uu dhex muquuro moolka gunta fog ee sooyaal-dhaqameedka Soomaalida. Inuu ka kalluumaysto kaydkaas isa soo biirsanayey ka ab iyo ka awoowe. Hodontinimada halkaas ceegaagta ayuu awood u yeeshay inuu kala soo dhex baxo suugaan-bilayaal uu ku dhiso bilicda riwaayaddiisa. Xitaa muu dhaafin shimbiraha laga curraafaysto cidooda iyo cid-booqashadooda, sida galowga, guuguulaha iyo gallayrka:*“Guuguulaa xalaytoole garabka iga dharbaaxay...”*. “*Taariikhahan gabaabsiyey qarnigan galowgu yeeraayo, ma garateen?”*

Xagga adeegsiga sarbeebta Xorriyo waxay salka ku haysaa hidde-suugaaneed joogtoobay. Tan iyo bilowgii fanka casriga ah sarbeebtu waxay noqotay summad lagu yaqaan suugaanta xambaarsan dhambaal hadaf siyaasadeed leh. Sababaha tan ugu weyn waxaa loo qaadan karaa fankan oo ka hoos dhashay cabburis gumeysi, lana kowsadey halgankii xornimo-doonka waddaniga. Fannaanku xor umuu ahayn in uu fekerkiisa si qayaxan u cabbiro. Wuxuu ku khasbanaa inuu ku maldaho sarbeeb iyo duurxul. Dhinac kale sideedaba sarbeebtu waa aalad waxtar u leh asluubaynta suugaanta. Waxay ka mid tahay xawaashka macaaneeya dhadhanka halabuurka, waa haddii loo adeegsado, si quxoon oon lahayn qallafsanaan lagu wareero. Waxay muhiim u tahay mowduucyada culus, sida siyaasadda iyo falsafadda. Waxay siisaa dhadhan lagu liqo oo lagu illaawo culayskii la dhibsan lahaa haddii si qayaxan loo soo mutuxo. Dhanka kale waxay waxtar u leedahay garaad-carbiska ama ka-fekersiinta daawadayaasha / dhageysteyaasha.

Dowladihii Soomaaliyeed ee gumeysiga dhaxlay, gaar ahaan tii milatariga ee ugu cimri dheerayd, waxay joogteeyeen cabburintii fekerka xorta ah ee laga dhaxlay gumeysiga. Sidaa awgeed ayay suugaanleyduna dhankooda waxay joogteeyeen adeegsigii sarbeebta iyo xeeladaha kale ee uu ka midka yahay duur-xulku. Sidaa ayay ku noqotay hidde ku xididdaysta maskaxda hal-abuurka. Waxay ku daabacantay dookha dadweynaha ee dhadhansiga fanka. Tusaale ahaan maanta qof kastoo caadi ah marka erayga “maan-deeq” (waa hal magaceede) uga soo dhex baxo hees ama tix ama hasaawe riwaayadeed, judhiiba wuu fahmayaa in ay tahay sarbeeb fannaanku ula jeedo calanka ama dalka iyo gobanimadiisa. Sidoo kale qof waliba wuu la fahmayaa marka fannaanku qarannimada ama gobonimada dalka ku qofeeyo gabar qiima badan.

Copyright © 2010 WardheerNews

Riwaayad dhisan dhaliileheedana leh

Marka la soo koobo, Xorriyo waxay ahayd riwaayad hanaqaad ah. Dhinacyada uu mu’allifku hibada weyn ku muujiyey waxaa ka mid ah hannaanka uu u dhisay haasaawaha riwaayadda. Afka suugaanaysan iyo oraahaha koobkooban ee ay laba-lisayaan matalayaasha riwaayaddu sidii kubbad ay isu dhiidhiibayaan ciyaartoy xul ah. Wuxuu ka hufay hadalkii badnaa ee lagu harraadi jirey. Waxaa kaloo bogaadin mudan sida mu’allifku u soo miirtay mincne casri ahna ugu xambaariyey sooyaalkii ummadda iyo suugaan-hiddeed ku daabacan dubaaqa daawatada. Waxaa iyana hoos-ka-xarriiqid mudan xilka waddaniga ah ee uu dhabarka u ritey xilli ay caado noqotay in mowduuca riwaayaduhu caashaq uun ku meeraysto. Waxay ahayd caado ay xoojisey cabsidii laga qabey riwaayado cabbiraya arrimaha xasaasiga ah ee lugta la gali kara siyaasad iyo maamul dowladeed.

Waxaa bogaadin mudan koobkoobidda hadalka iyo adeegsiga sarbeebta oo labaduba fursad siiyey fasiraadda dadweynaha iyo ka-fekersiinta bulshada. Way fiicantahay abwaanku in aanu dadkiisa ka dhigin “damiin far waaweyn wax loogu dhigayo”, in kastoo dhanka kale casrigan laga tagey caadadii ahayd cuslaynta suugaanta iyo caad-saarka laga badbadiyey.

Haddaan dhanka kale u rogno, dhinacyadaas badan oo ay ka dhisnayd riwaayaddii Xorriyo micneheedu ma aha inay ahayd biya-kama-dhibcaan aan dhaliil lahayn. Ma dhici karto in wax dhaliil ah laga waayo shaqo fan iyo suugaaneed. Dulduleellada Xorriyo waa kuwo idil ahaan ka dhalanaya quwadda la wada dul dhigay dhanka hadalka uun, waxaana ka mid ah:

1. Muujin la’aanta dabciga iyo dareenka hoose ee qof kastoo ka mid ah qofafka (characters) riwaayaddu ku socoto. Waxaa xoogga la saaray uun qofku waxa uu ku hadlo. Waxaa la illaawey in laga bixiyo sawir cad oo daawatada bara dabciga u gaarka ah iyo sida dareenkiisu marba isu beddelayo, bini aadan ahaan. Marka Xorriyo laga reebo xitaa ma jiro qof loogu yeerayo magaciisii jilitaanka, wallow uu furitaanka hore ninka riwaayadda qaddimayaa (Maxamuud Duwane) qof walba noo sheegayo magaca uu riwaayadda ku jilayo.

2. Silsiladda riwaayadda (plot) habka la isu surayo iyo qaabka falalku isaga daba dhacayaan ma laha diirrimaad iyo xiisa-galin u dhigma dhumucda ay leedahay fikaradda ama qisada riwaayaddu ku dhisantahay. Dhinaca xuma-diidku (Xorriyo iyo eheladeed) si bay u taag daran yihiin oo firfircooni la’yihiin, illaa ay si kadis ah qolada kale u xirxiraan. Waxaa la moodaa inay jiraan muuqaallo laga boodey oo riwaayaddu u dhutinayso. Tusaale ahaan waxaa jira “geesi” ama halyey marba la soo hadal qaadayo: “*Dumaasha geesi bayska leh / aan weligi daalayn” “Gabadhaan aad arkayso / geesigii qabey baa / aqalka geeska ka taagan / gaalleeftiisa afaystay …”*. Sidaa uun baa loo hadal hayaa, haseyeeshee marna ma soo baxayo shakhsiyad ahaan. Haddii silsiladda lagu dari lahaa dhacdooyin na

Copyright © 2010 WardheerNews

tusaya geesigaas oo loollan kula jira Gardarro iyo sharwadeenkeeda diirrimaadka riwaayaddu intan wuu ka sare mari lahaa.

3. Gabood-falka iyo gardarrada ay ka gilgilanayaan ehelada Xorriyo waxaa la moodaa inay ku kooban tahay gabadha afarta nin wada guursadeen, halkii ay ahayd in xumaanta weyn ee laga dhiidhiyey ay u muuqato dhaca iyo afduubka loogu xoog-sheegtay gabadha; guurka iyo afarta nin waa xumaan labaad oo ay dhashay tan hore. Micnaha dalka xoogga lagu qabsaday ayaa ah hooyada xuma-falka. Sida xun ee loogu tagrifalayna waa ubadkii hooyadaasi dhashay. Halka lagu heesayo “*gabadhayada, afar nin inay guursadaan, diidnay”*, waa sax, waxayse ahayd inay ka horrayso “gabadhayada in la xoogo diidnay!”

Dhalliilahaas caadiga ah marka dhinac la iska dhigo, shaki kuma jiro “Xorriyo” inay tahay shaqo fan oo qiime sare leh, istaahishana qaddarin iyo bogaadin, xagga qaabka iyo nuxurkaba. Nuxur ahaan, mu’allifku ujeeddo kasta ha ka lahaado, waxay doonto ha noqoto fikraddii uu rabey in uu ku cabbiro, suurtagal ha noqoto inay ogaan-la`aan ugu soo fateheen ilaha maanka dahsoon (subconsciousness), waxse aanu shaki ku jirin Xorriyo inay daaha ka rogtey dood ummadda qaaye weyn u leh. Waxay ku guulaysatay dhaqaajinta dareenka dadweynaha. Maxaa yeelay waxay xoqday boog xanuun ku haysey xiska bulsho-weynta. Waa taa tan ay ku mutaysatay inuu dadku xabadka ku qaato ama ka xiisa goyn waayo.

Gunaanadka iyo Gocashooyin dhawr ah

Dib u eegista Xorriyo waxay nagu dhalinaysaa gocashooyin dhawr ah:

- Tan koowaad waxay na xasuusinaysaa fanka riwaayadda samayntu heerkii uu gaarey iyo qiimihii uu u lahaa Soomaalidii magaalowdey burburka ka hor;

- Waxaan gocanaynnaa sidii ay Soomaalidu u jeclayd fanka iyo suugaanta, sidii ay uga dhigan jireen toosh ay isku tusaan dhibaatooyinka halista ah kuna tilmaansadaan waddada horumarka;

- Waxaan ka murugoonaynnaa halka uu maanta yaal shaygii qiimahaas lahaa iyo darxumada ay ku sugan yihiin fannaaniintii Soomaaliyeed, siiba kuwa weli ku harsan dalkoodii hooyo;

- Magaca riwaayaddu wuxuu na xasuusinayaa sida weli loo la’yahay “Xorriyo nin geya”; hoggaamiye ducaysan oo dalka dhibaatada ka saara. Xorriyo haddii uu Sangub ku sawirayey taariikhdii isticmaarka, Soomaalidii joogtey 1980kiina u fasirteen inay ka hadlayso wixii xilligaas taagnaa, sidii si le’eg Soomaalida imminka joogtaana waxay u fasiran kartaa xaaladda uu maanta dalkani ku sugan yahay; dal ay xaaraan ku qabsadeen, burburiyeen, welina u afduuban dagaal-oogayaal marba midab la soo baxaya, cadow shisheeye ah oo aa la wada arki karinna si dahsoon isugu dhiibayo dab ay ku gubaan dalkooda iyo dadkooda.

Copyright © 2010 WardheerNews

Dadku waxay is weydiinayaan waa maxay inkaarta garba-duubtay “geyaankii Xorriyo”! Maxay u awoodi la’yihiin inay Xorriyo waraabaha ka ridaan? Jawaabtu waxay tahay: way dayaysan yihiin, way dawakhsan yihiin, dawgii baa laga habaabiyey. Waxay arki kari la’yihiin halka sartu ka qurmayso, halka laga soo galay iyo cadowga daaqadda ka soo dusay ee ceelka ay ka cabbayeen isha ka sumaynaya, ***cindigoodana*** ku beeraya ***canaanta*** oo dhan inay ***iyagu*** leeyihiin. Cudurka ku haya haddaanad fahmin dawadiisa ma heli kartid.

Hayeeshee way iman doontaa maalin cudurka la fahmo, Xorriyo loo ciidamo caafimaadna la gaaro. Maalin ay dhabowdo sadaasha Sulub (Baacalwaan) hirwadii Sayid Maxamed ku heesayo:

Wallee Xorriyaay xaq baa imanoo
Xalaal meherkaagu wuu noqon hooooooooy!!

“Sida ay u il xuntahay uma Alle la’a”!

Maxamed D. Afrax
E-Mail: mdafrax@gmail.com

Copyright © 2010 WardheerNews